

MAAREYNTA

# Doorashooyinkaada Lacag-bixinta



Shaqaale cusub ahaan, waxaa lagu sheegi doonaa inaad dejisato xulashooyinkaada mushahar ku helida. Tilmaamaha hoose ayaa kaa caawin doona inaad marka hore dejisato xulashooyinka mushahar ku helida iyo sidoo kale inaad wax isbeddel ah ku sameyso mustaqbalka.

**Waxaad mushaharkaaga ku heli kartaa:**

- Debaaji toos ah (hal ama akoono badan)
- Kaarka Wisely Pay ee ay bixiso CDWA
- Kaar lacag-bixin oo horeyba u sii jira
- Ama isku darka debaaji toos ah iyo kaarka lacag-bixinta


Waxaad u baahan doontaa macluumaadka akoonkaaga. *Macluumaadka aad saxda ahayn waxa uu keeni doonaa dib u dhac ku yimaada helitaanka mushaharkaaga.*

## Sida loo galo Xulashooyinkaada Lacag-bixinta

### Ka gelida xulashooyinkaada lacag bixinta adoo u maraaya abka Pay ee ku jirta gudaha Workday

1. Gal [bogga internetka DirectMyCare](#) ee CDWA.
2. Markaad joogto shaashada My Dashboard (Dhaashboodh-kayga), guji badhanka **Workday (Shaqada Maalinta)** si aad u tagto boggaaga koowaad ee Workday.  
*\*Haddii aad tagtid bogga gelitaanka, geli isla magaca adeegsadaha iyo lambar sireedka ee loo isticmaalay in lagu galo [bogga internetka DirectMyCare](#).*

3. Guji **View All Apps (Eeg Dhamaan Ababka)**.
4. Guji **Pay app (abka Pay)**.
5. Guji **Payment Elections (Xulashooyinka Lacag-bixinta)** ee ku jira gudaha qaybta View/Update Elections (Eeg/Cusbooneysii Xulashooyinka). (Jaantuska 01)



Jaantuska 01


6. Isticmaal badhamada si aad u maareyso xulashooyinka lacag bixinta ee hadda jira. (Jaantuska 02)
  - **Tifaftir:** wax ka beddel/sax macluumaadka bankiga
  - **Ka saar:** ka saar macluumaadka debaajiga tooska ah
  - **Eeg:** eeg macluumaadka debaajiga tooska ah



Jaantuska 02

### Marin uga helida xulashooyinkaada lacag-bixinta iyada oo loo marayo hawlahaaga Shaqo kala barida ee gudaha Workday

Iyada oo qayb ka ah hawshaada shaqo kala barista waxaad u baahan doontaa inaad dejisato xulashooyinkaada lacag-bixinta (tilmaamaha hoos ayey ku qoran yihiin). Haddii aad ku soo laabanayso Xulashooyinka Lacag-bixinta adiga oo ka gujinaya abka Pay gudaha Workday, waxaad awoodi doontaa inaad marin u hesho isla xulashooyinka adiga oo ka gujinaya badhanka **Add (Ku dar)** hoosta macluumaadka akoonkaada. (Jaantuska 03)



Jaantuska 03

## Xulashada Habka Lacag-bixinta (loo baahan yahay)

### Habka Lacag-bixinta ee La door bidaayo

1. Gudaha goobta **Payroll Election Rule (Xeerka Xulashada Mushahar-bixinta)**, ka dooro haddii aad rabto Debaajiga Tooska ah (tani waxaa ka mid ah kaarka lacag-bixinta ee horeyba u sii jira) (Jaantuska 04) ama kaarka cusub ee Wisely Pay (Jaantuska 05).

Preferred Payment Method

Payroll Election Rule \*

Expense Election Rule \*

Jaantuska 04

Preferred Payment Method

Payroll Election Rule \*

Expense Election Rule \*

Jaantuska 05

2. Gudaha **Expense Election Rule (Xeerka Xulashada Kharashka)**, u dooro **Gacan ahaan** wixii ah xulashada lacag-bixinta kharashkaaga. (Jaantuska 06)
  - Haddii aad tahay IP loo oggolaaday masaafada, waxaa lacag-celinta laguugu sameyn doonaa mushahar-bixintaada caadiga ah.

Preferred Payment Method

Payroll Election Rule \*

Expense Election Rule \*

Jaantuska 06

### Macluumaadka Akoonka

3. Haddii aad xulatay **Direct Deposit (Debaajiga Tooska ah)**, geli macluumaadka akoonkaaga meelaha loo baahan yahay ee lagu tilmaamayo calaamadda cas (\*). (Jaantuska 07) **Si fiican isaga hubso akoonkaaga iyo macluumaadka hab lacag dirista.** Khaladaadku waxay keeni karaan in lagu siiyo kaarka Wisely Pay.

**OGOW:** Ha ku darin xariiqmo yaryar gudaha lambarada koontada ama aqoonsiga bankiga. Tani waxay sababi doontaa in macluumaadkaaga la diido oona lagu siiyo kaarka Wisely Pay.

Account Information

Account Nickname (optional)

Routing Transit Number \*

Bank Name \*

Bank Identification Code

Account Type \*  Checking  Savings

Account Number \*

Jaantuska 07

4. Haddii aad xulatay **Kaarka Wisely Pay**, geli macluumaadka soo socda meelaha loo baahan yahay sida lagu muujiyay. (Jaantuska 08)

● **Lambarka Loo Isticmaalo In Lagu Aqoonsado Bankiga:** 071922476

● **Magaca Bankiga:** Wisely

● **Nooca Akoonka:** Isticmaalka Maalinlaha ah

● **Lambarka Akoonka:** 1

**OGOW:** Oggolow in 7-10 maalmood oo shaqo uu ku imaado kaadhkaga lacag-bixinta ee Wisely Pay boostada isagoo ku jira baqshad cad. Baqshaddan waxaa ku jiri doona tilmaamo ku saabsan sida looga shaqo geliyo kaarkaga lacag bixinta ee Wisely Pay.

5. Markaad dhameeyso, guji **OK** si aad u sii socoto.

**MARKA XIGTA:** Waxaad lahaan doontaa ikhtiyaarka ah inaad u kala qaybiso lacagtaada akoonnada.

Haddii aadan kala qeybineynin lacagta, dib u eeg macluumaadkaada oona guji **Submit (Gudbi)**.

● Haddii aad rabto inaad u kala qaybiso mushaharkaaga akoonnada, u sii soco tillaabooyinka xiga.

Account Information

Account Nickname (optional)

Routing Transit Number \* 071922476

Bank Name \* Wisely

Bank Identification Code

Account Type \*  Checking  Savings

Account Number \* 1

Jaantuska 08

## U Kala Qaybinta Mushaharka Akoonnada (ikhtiyaari)

Waxaad dooran kartaa in lacagtaada lagu shubo akoono badan (mida sida maalinlaha ah loo isticmaalo, tan kaydinta, iyo/ama kaadhka Wisely Pay). Waxaad u qaybin kartaa lacagta qaddar ama boqolley ahaan. Waxaad haysan kartaa ilaa hal kaadh oo Wisely Pay ah iyo lix akoon oo bangi oo debaajiga toos lagu sameeyo.

Si aad lacagtaada ugu kala qaybiso akoono badan, waxaad u baahan doontaa inaad marka hore ku darto dhammaan akoonnadaada. Raac tillaabooyinka hoose:

1. Guji badhanka **Add (Ku dar)**. (Jaantuska 09)
2. Geli macluumaadka meelaha loo baahan yahay.
3. Guji **OK**.
4. Ku celi tillaabooyinka 1-3 haddii aad leedahay akoono badan.
5. Markaad ku soo darto dhammaan akoonnadaada, guji **Save (Keydi)**.

**OGOW:** Ha ku darin xariiqmo yaryar gudaha lambarada koontada ama aqoonsiga bankiga. Tani waxay sababi doontaa in macluumaadkaaga la diido.

Si fiican u hubi macluumaadka koontadaada iyo lambarka aqoonsiga ee bankiga ee akoon kasta. *Macluumaadka aad saxda ahayn waxa uu keeni doonaa dib u dhac ku yimaada helitaanka mushaharkaaga.*

Account Nickname	Country
Wisely *****1	United States of Ame

**Add**

Jaantuska 09

Ka dib marka koontooyinkaaga lagu daro, waxaad u baahan doontaa inaad ku diiwaangeliso akoonnada Xulashadaada Mushahar-bixinta.

1. Gudaha qeybta Payment Elections (Xulashooyinka Lacag-bixinta), guji badhanka **Edit (Tifaftir)** ee ku jira qariiqda Xeerka Xulashada Lacag-bixinta ee CDWA. (Jaantuska 10)

Pay Type	Payment Type	Account	Account Number	Distribution	
Expense Election Rule	Manual			Balance	<input type="checkbox"/> Edit
Payroll Election Rule CDWA	Wisely Pay Card	Wisely *****1	*****1	Balance	<input checked="" type="checkbox"/> Edit

Jaantuska 10

2. Guji badhanka **+** si aad ugu darto akoonka(nada) dheeraadka ah ee aad sameysay. (Jaantuska 11)

**+** Order \*Country

United States of America

Jaantuska 11

3. Guji goobaha si aad uga doorato meelaha hoos u dhaca ee kuwan soo socda:
  - **Country (Wadanka)** (dooro - United States of America)
  - **Currency (Lacagta)** (dooro - USD)
  - **Payment Type (Nooca Lacag-bixinta)** (dooro Direct Deposit (Debaajiga Tooska ah) ama kaarka Wisely Pay)
  - **Account (Akoonka)** (ka dooro liiska akoonada ee aad ku soo darty) (Jaantuska 12)

\*Payment Type: Direct Deposit

Account Search:

- Chase \*\*\*\*\*5465
- Wells Fargo \*\*\*\*\*2312
- Wisely \*\*\*\*\*1

Jaantuska 12

4. Gudaha goobaha **Balance/Amount/Percent (Baaqiga/Qadarka/Boqolleyda)** , dooro qaddarka dollarka ama boqolleyda ee aad rabto in aad ku shubto akoon kasta.


- Haddii aad u kala qaybineyso boqolley ahaan, marka la isku daro wadarta guud waa iney isugu darsantaa 100%.
- Haddii aad u kala qeybineyso qadar ahaan, akoonka ugu danbeysa waxeey u baahan tahay iney lahaato **Balance (Baaqiga)** la doortay si u noqoto qadarka hartay. (*Jaantuska 14*)
- Waxaad bedeli kartaa sidey u kala horeeyaan akoonnada adigoo gujinaya fallaadhaha
- gudaha tiirka Order (Kala horeynta). (*Jaantuska 13*)



Payment Elections 2 items

	Order	*Country
+ -		United States of America

*Jaantuska 13*



\*Balance / Amount / Percent

Balance

Amount

Percent

Balance

Amount

Percent

*Jaantuska 14*

5. Markaad dhameyso, **dib** u eeg dhamaan macluumaadka ka hor intaadan gujinin **Submit (Gudbi)**. *Macluumaadka aad saxda ahayn waxa uu keeni doonaa dib u dhac ku yimaada helitaanka mushaharkaaga.*

6. Waxaa dib lagugu soo celin doonaa shaashadda Maaree Xulashooyinka Lacag-bixinta. Haddii aad gebi ahaanba dhameyso, guji **Submit (Gudbi)**.